

# Kala hadalka reer Alberta wax ku saabsan manhajka cilmiga bulshada ee cusub

Sibtambar 18, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dawladda Alberta waxa ay bilaabaysaa hannaan daahfuran oo iskaashi oo ay kaga qaybgelinayso reer Alberta iyo shuraakooyinka waxbarasheed dib u sameynta qabyo-qoraalka manhajka cilmiga bulshada rawdada illaa Fasalka 6 (K-6).

Iyada oo adeegsanaysa ra'yi-celintii qiimaha lahayd ee reer Alberta ay bixiyeen labadii sano ee u dambeeyey, Alberta Education waxa ay dib u samaynaysaa qabyo-qoraalka manhajka cilmiga bulshada ee K-6 si ay u xaqiijiso casharadu inay dhisayaan fekerka naqdinta leh iyo xirfadaha xidhiidhka ee ardayda, xoojinayaan aragtiyaha Dadka Dhulka Loogu Yimid, dhaqanada badan iyo dadka ku hadla Faransiiska isla markaana ay yihiin kuwo da'da iyo korniinkaba ku habboon. Si ay u tayeeyso hannaanka dib u sameynta qabyo-qoraalka, wasaaraddu waxa ay kula shaqaynaysaa reer Alberta iyo shuraakooyinka waxbarashada hannaan dhamaystiran oo marxalado leh.

“Cilmiga bulshadu waa qayb muhiim ah oo kamid ah qaybaha uu ka kooban yahay manhajka K-12 ee Alberta, taas oo ah sababta aan ugu faraxsanahay inaan ku dhawaaqo qorshe cusub oo aan kula shaqaynayo reer Alberta. Ka wasiirka waxbarashada ahaan, waxa himiladaydu tahay manhaj cilmi bulsho oo ka taageeri doona ardayda inay yeeshaan xirfado nololeed oo muhiim ah, sida xallinta mashaakilka iyo fekerka naqdinta leh, isaga oo xoojinaya awooddooda inay si cad u cabbiraan fekradaha oo fahmaan aragtiyaha dunida ee kala duwan. Waxa aan ku kalsoonahay hannaankan lagaga qaybgalinayo macallimiinta, waalidiinta, hoggaamiyeyaasha Dadka Dhulka Loogu Yimid, Métis, dhaqanada badan iyo dadka ku hadla Faransiiska, khubarada maaddada, guddiyada dugsiyada iyo dadka kale inuu dhisi doono manhaj dhammaystiran oo u diyaariya ardaydeena guul waarta.”

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada*

Horraantii xagaagan, wasiirka waxbarashadu waxa uu la kulmay shuraakooyin waxbarasho oo kala duwan si uu u dhiso fahanka hannaanka ka qaybgelinta ee cusub iyo habka horumarinta manhajka marka ay noqoto mustaqbalka.

Alberta Education waxa ay bilaabaysaa marxaladda labaad ee ka qaybgelinta waxaana ay ururin doontaa macluumaad ku saabsan waxa reer Alberta ay jeclaan lahaayeen ardaydu inay ku bartaan cilmiga bulshada iyada oo loo marayo hage xog-ururin iyo doodeed oo onlayn ah, kaas oo la heli doono illaa oktoobar 16.

Dayrtan, Alberta Education waxa ay la kulmi doontaa shuraakooyinka waxbarashada, macallimiinta, hay'adaha dhaqanada badan, bulshooyinka Dadka Dhulka Loogu Yimid iyo dadka Faransiiska ku hadla, iyo khabaro waxbarasheed oo kale si loo tayeeyo horumarinta baaxadda iyo isku xigxigitaanka manhajka cilmiga bulshada ee K-12 iyo casharada qabyo qoraalka manhajka cilmiga bulshada ee K-6. Baaxadda iyo isku xigxigitaanka manhajku waa agab qorsheyn oo loogu talagalay sameeyayaasha manhajyada kaas oo xaddida diirad saaridda waxbarashada ardayga laga soo bilaabo rawdada illaa Fasalka 12 isla markaana tayeeya horumarinta casharrada manhajka.

Horraanta 2024, Alberta Education waxa ay bilaabi doontaa inay dadweynaha reer Alberta ka qaybgaliso, halkaas oo ay fursad u siin doonto inay ra'yi-celin ka bixiyaan waxbarashooyinka muhiimka ah ee manhajka cilmiga bulshada ee K-12 isla markaana eegaan qabyo-qoraalka manhajka cilmiga bulshada ee K-6 si ay u bixiyaan ra'yi-celin dheeraad ah.

Inta lagu gudo jiro sannad dugsiyeedka 2024-25, macallimiintu waxa ay awood u yeelan doonaan inay ku tijaabiyaan qabyo-qoraalka manhajka cilmiga bulshada ee K-6 ee la horumariyey fasallada dhexdooda isla markaana ay bixiyaan ra'yi-celin dheeraad ah taas oo qayb ka ah marxaladda ugu dambaysa ee ka qaybgelinta.

Iskaashiga lala sameeyo shuraakooyinka waxbarasha iyo reer Alberta marxaladaha kala duwan ee hannaanka ka qaybgelinta waxa uu xaqiijin doonaa aqoontooda iyo aragtiyahooga in la tixgeliyo wakhtiga munaasabka ah. Hannaankan bartilmaameedsan waxa uu u sahli doonaa dawladdu inay ogaato aragtiyaha daneeyayaasha kala duwan una adeegsato khibraddooda horumarinta iyo dhaqangelinta manhajka.

## **Xaqiiqooyinka kooban**

- Cilmiga bulshadu waa mawduuc takhasusyo badan oo ka kooban casharo ku saabsan taariikh, juquraafi, cilmiga dhaqaalaha, dawladda iyo bulshada. Waxbarashada cilmiga bulshadu waxa ay dhisi kartaa muwaadiniin firfircoon, xog-ogaal ah oo xilkas ah kuwaas oo kaalin mihiim ah ka ciyaara bulshooyinkooga isla markaana aqoon u leh xuquuqda, masuuliyadaha iyo go'aan-qaadashada.

## **Macluumaad la xidhiidha**

[Dib u cusboonaysiinta manhajka K illaa 6](#)